

## **Cabashooyinka ka Dhanka ah Turjubaanada**

Waaxda Garsoorka ee Maine waxaa ka go'an in ay hubiso in dadka oo dhan ay helaan caddaalad. Dadka aan si fiican ugu hadlin afka Ingiriisiga ah, waxay u baahan karaan caawinaadda turjubaanada.

Xafiiska Maamulka ee Maxkamadaha wuxuu maamulaa adeegyada turjubaan ee Waaxda Garsoorka ee Maine, ayadoo qayb ka mid ah shaqadaas ay tahay, maamulidda liiska turjubaanada ee Waaxda Garsoorka. Liiskaas wuxuu ka kooban yahay koox turjubaano ah oo qaban karta adeegyada turjubaanka maxkamadaha Maine.

Marka ay turjubaan kuu keento Waaxda Garsoorka, Waaxdu waa inay ku kalsoontahay, awoodna u leedahay inay hubiso xirfada, waxqabadka, iyo daacadnimada turjubaankaas, sababtaas awgeed, turjubaanada lagu daro liiska Waaxda Garsoorka waxaa si buuxda mas'uul uga ah Maamulka Maxkamadda Gobolka ama qof loo xilsaaray.

### **Habka Cabashada**

Cabasho qoraal ah<sup>1</sup>, oo saxiixan oo qeexaysa in qof turjubaan ah uu ku dhaqmay hab aan waafaqsanayn *Heerarka Dhaqanka Xirfadeed ee Loogu Talagalay Turjumaaniinta Bixinaya Adeegyada Nidaamyada Waxqabad ee Sharciga Maxkamadda*, ama turjubaanka oo u dhaqmay qaab su'aal galinaya awoodda turjubaankaas inuu si wax ku oolnimo leh uga shaqeeyo maxkamadda ayaa loo soo diri karaa:

Communication Access Specialist  
Administrative Office of the Courts  
P.O. Box 4820  
Portland, ME 04112-4820  
[interpreters@courts.maine.gov](mailto:interpreters@courts.maine.gov)  
(207) 822-0703

Cabashada waa in lagu qoraa sifada dhaqanka aan munaasabka ahayn ee lagu eedeynayo turjubaanka. Haddii ay suurtagal tahay, cabashada waa in sidoo kale lagu soo daraa taariikhda, waqtiga, iyo meesha uu ka dhacay dhaqanka lagu eedeynayo turjubaanka, lambarka galka ee dacwadda, iyo magaca, ciwaanka iyo lambarka taleefanka ee marqaatiyada.

Marka cabashada qoran la helo, waxaa eegi doona Masuulka Helitaanka Xariirka ((Communication Access Specialist (CAS), oo la tashanaya Maamulaha Dacwadaha Madaniga iyo Helitaanka Maxkamadda ((Manager of Civil Process and Court Access (MCPCA).

Haddii CAS-ku go'aamiyo in eedeymaha, haddii ay run yihiin, aysan mudneyn qaadasho ficil edbin, CAS-ka ayaa tuuri doono cabashada wuxuuna ku wargalin doonaa qofka cabashadaas soo gudbiyay in la tuuray. Wargalintaas waa in lagu xusaa sharaxaad ku saabsan sababta (ama sababaha) go'aanka CAS-ka in cabashada aysan saldhig u noqon karin eedeyn keeni karta qaadasho ficil edbin. CAS-ka ayaa sidoo kale ku wargelin doona turjubaanka in cabashada la faylgareeyay lana tuuray. Go'aanka CAS-ka in cabashada la tuuro waa mid kama dambyes ah.

---

<sup>1</sup> Cabashada waxaa lagu soo gudbin karaa qaab kale oo la aqbali karo

Haddii CAS-ku uu go'aamiyo in eedeymaha, haddii ay run, ay mudanyihiin qaadasho ficil edbin ah, CAS-ku wuxuu soo ururin karaa macluumaad dheeraad ah si loo ogaado haddii ay cabashadu u baahantahay in la soo baadho. Haddii CAS-ku go'aamiyo in baaritaan loo baahanyahay, CAS-ku warqad ayuu turjubaanka u soo diri doonaa oo ogeysiineysa baaritaanka, waxaana lagu qeexaya warqadaas faahfaahinta eedeymaha loo soo wajahay isaga/ iyada. Warqadaasi waxay sidoo kale ku wargelin doontaa turjubaanka hadduu dhici doono wax isbedel ah oo ku saabsan xaaladdiisa/xaaladdeeda ee liiska turjubaanada Waaxda Garsoorka, inta uu socdo baaritaanka cabashada. Inta cabashada la baadhayo, CAS-ku wuxuu u ogolaan karaa turjubaanka inuu ku sii jiro liiska turjubaanada maxkamadda, ama wuu ka joojin karaa turjubaanka liiska turjubaanka. Haddii CAS-ku ka joojiyo turjubaanka liiska turjubaanada, inta baaritaanka la sugayo, CAS-ku waa inuu cusbooneysiisaa liiska turjubaanada ee laga heli karo karaaniga maxkamadda

Haddii turjubaanka uu rabo in uu ka jawaabo cabashada, turjubaanka waxaa la siin doonaa 14 maalmood laga bilaabo taariikhda ogaysiiska cabashada loo soo diray si uu uga keeno jawaab qoraal ah.<sup>2</sup> Waqtiga ugu dambeeya ee ka soo jawaabidda waa in lagu daro ogeysiiska cabashada. Iyadoo ay tahay Masuuliyadiisa/Masuuliyadeeda gaarka ah, haduu codsi ka yimaadu turjubaanka, CAS-ku wuxuu u ogolaan karaa turjubaanka muddo dheeraad ah oo uu ku soo jawaabo. Muddadaan dheeraadka ah waa in aanay dhaafin 28 maalmood.

Inta lagu jiro baaritaanka, CAS-ka ayaa qiimeyn doona dhammaan macluumaadka laga heli karo oo ku saabsan cabashada. Marka lasoo gabagabeeyo dib u eegista, CAS-ku, isaga oo la tashanaya MCPCA-ga, wuxuu gaarayaa go'aan kama dambays ah oo ku haboon xaalada.

Hadduu CAS-ku go'aamiyo in aanay jirin sabab loo qaato ficil edbin ah, CAS-ka ayaa tuuri doono cabashada wuxuuna ku wargalin doonaa qofka cabashadaas soo gudbiyay in la turay. Wargalintaas waa in lagu xusaa sharaxaad ku saabsan sababta (ama sababaha) go'aanka CAS-ka in cabashada aysan saldhig u noqon karin eedeyn keeni karta qaadasho ficil edbin. CAS-ka ayaa sidoo kale ku wargelin doona turjubaanka tuurida cabashada iyo dib u soo celinta turjubaanka ee liiska turjubaanada maxkamadda, haddii turjubaanka laga joojiyay shaqada inta lagu jiray baaritaanka. Go'aanka CAS-ka in cabashada la tuuro waa mid kama dambeys ah.

Haddii CAS-ku uu go'aamiyo in ay jiraan sababo loo qaato ficil edbin ah, CAS-ka waxaa laga yaabaa in uu qaato tallaabo kasta oo ku haboon. Tallaabadaas ayaa noqon karta, laakiin aan ku koobneyn, soo saarista canaan, soo saarista qorshe lagu saxayo oo u baahan turjubaanka in uu qaado tallaabooyin si loogu soo celiyo ama loogu sii hayo liiska turjubaanada ee Waaxda Garsoorka, ka qaadista turjubaanka liiska turjubaanada ee Waaxda Garsoorka muddo cayiman, iyo ka qaadista turjubaanka liiska turjubaanada ee Waaxda Garsoorka si kama dambeys ah.

Hadduu go'aanku noqdo in laga saaro turjubaanka liiska turjubaanada si kama dambeys ah, CAS-ku wuxuu u gudbin doonaa dacwada Maamulaha Maxkamadda Gobolka ama qof kale oo loo xilsaaro si loo eego haboonaanta go'aankaas inta aan la fulin.

CAS-ka ayaa gaarsiin doona turjubaanka iyo qofka cabashada soo gudbiyay natiijada ayada oo qoraal ah. CAS-ka go'aankiisa in fecil edbin loo baahanyahay, iyo CAS-ka go'aankiisa ee fecilka edbinta labaduba waa kuwa kama dambeys ah.

---

<sup>2</sup> Jawaabtu waxaa lagu soo diri karaa qaab kale oo la aqbali karo.